


Tababarka Xalalka waara ee loogu talagay Bulshooyinka uu saameyey Barakaca gudaha Somalia

Koorsada 2aad. Kulanka 1aad: Hanaanka ku saleysan aagg eexalalka waara

Faalo Kooban

Koorsadani labaad waxay diiradda saaraysaa "sida loo sameeyo" waxayna soo jeedinaysaa 4 talaabo oo tilmaam astaan u ah soo saarista barnaamijyada xalal waara oo loogu talagalay Bulshooyinka Barakacu saameyey. Talaabada ugu horeysa ee howshan (iyo kulanka casharka ugu horeeya ee koorsada 2aad) waa in laqaato hanaan ku saleysan aag (mararka qaarna loogu yeero hanaanka ku saleysan deegaan). Kulankan waxaan kala saari doonnaa qeexitaanka hanaanka ku saleysan aagga oo aan ka wada hadli doonno faa'iidooyinkiisa ugu weyn. Ka dib waxaan si qoto dheer ugu geli doonnaa qaababka ku-saleysan aagga oo aan baari doonnaa mabaadi'da / astaamaha ugu waaweyn ee hagaya fulintiisa. Waxaan sidoo kale diirada saari doonaa laba qaybood oo muhiim ah oo ka mid ah habka loo wajahayo: "hal aag" iyo "dadka oo dhan" iyadoo loo marayo doodaha ku saabsan shuruudaha hagaya xulashada iyo xadeynta aagga iyo beegsiga dadka.

Ujeedooyinka

Dhamaadka kal-fadhiga, waxaad awoodi doontaa inaad:

- Qeexdo waxa ‘hab deegaan ku saleysan’ ay tahay.
- Baarto faa'iidooyinka habka noocan oo kale ah u leeyihiin bulshooyinka uu saameyey barakaca, maamulada heer qaran iyo heer degmo, iyo la-hawlgalayaasha gargaarka
- Baarto canaasiirta iyo qaybaha ugu muhiimsan ee habka ku saleysan aagga ee xalalka waara
- Bilowdo adeegsiga habka ku saleysan aagga iyadoo loo marayo xadeynta iyo beegsiga habraacyada

Fariimaha Muhimka ah

1. **Qaabka ku saleysan aaggu waa qaab awood u siinaya wax ka qabashada baahiyaha dhammaan bulshada aysaameeyeen barakacyadu ee ku sugan aag cayiman.**
2. **Habka ku saleysan aagga wuxuu ka kooban yahay qeexidda aagga, ama degsiimada, waax ama koox la beegsaday badelkeed, si ay u noqoto dariiqa ugu weyn ee laga soo galo. Dhammaan daneeyayaasha, adeegyada iyo baahiyaha waa la koobaa oo la qiimeeyaa, oo ururada iyo qaybaha ku habboonna ayaa la abaabulaa oo la isku duwaa.**
3. **Xulashada aagga ama degsiimada waa inay ku saleysnaataa shuruudo ay ka mid yihiin jiritaanka bulshooyinka barakacyadu ay saameeyeen, arrimaha u gaarka ah barakaca iyo halista,**

4. **Xadeynta aaggu waa inay tixgelisaa jiritaanka xuduudaha maamul, bulsho-dhaqaale iyo / ama xuduudo muuqda.**
5. **Habka ku saleysan aagga wuxuu beegsadaa dadka ugu nugul ee bulshooyinka barakacyadu ay saameeyeen oo dhan iyadoo sidoo kale la tixgelinayo awoodda bulshooyinka barakacyadu ay saameeyeen iyo khataraha u gaarka barakaca iyo arrimaha ilaalinta.**

Ogsoonow in qoraallada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ah lagu xusay bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka

Habka Gudbinta Casharada

Qaabdhismeedka

Kulankaan wuxuu u qaybsan yahay saddex qaybood iyo laba qaybood oo hoos yimaada:

1. Hanaanka aagga deegaanka ku saleysan
   Halkani waa meesha aad ku kala fureyso qeexitaanka habka ku saleysan aagga iyo waxa loola jeedo hadal ahaan. Habka ku saleysan aagga wuxuu gacan ka geysan karaa ka falcelinta baahiyaha bulshooyinka barakacyadu ay saameeyeen maadaama ay tixgelineyso dhammaan dadweynaha ku nool aag juqraafiyeed gaar ah iyadoo fiiro gaar ah loo leeyahay baahiyaha u gaarka ah barakaca qaas ah ee ay leeyihiin Barakacayaasha, qaxootiga iyo dadka soo laabtay. Qeexida qaabkan, oo ay kujiraan afarteeda qaybood ee ugu waawayn (aag gaar ah, dadweyne dhan, daneeyayaal badan, qaybo badan) ayaa si tartiib tartiib ah ay u ogaanayaan kaqeybgalayaashu ayadoo loo marayo hawlo (hoosta lagu sharaxay). Bogagga soo socda ayaa ah habab kala duwan oo lagu sharxo loona sawiro waxa ay uga dhigan marka la eego xaqiiqada ka jirta deegaanka. Tani waa mid muhiim ah si loo hubiyo in dhammaan kaqeybgalayaashu ay fahmaan fikradda guud maadaama ay tahay bar laga bilowa habka guud ee la soo jeediyey.

2. Maxay tahay sababta loo qaadanayo habka ku saleysan aagga?
   Ujeeddada qaybtan ayaa ah in kaqeybgalayaasha laga dhigo inay u hoggaansamaan habka aagga ku saleysan iyaga oo isku dayaya oo aqoonsanaya faa'iidooyinka ka iman kara. Waxaa si aad ah loogu talinayaa inaad isku daydo oo aad iyaga ka dhigto inay ka fekeraan oo ay soo helaan faa'iidooyinka ka imaan kara howlaha la soo jeediyey ka hor intaadan u sheegin.

3. Sidee loo sameeyaa?

   Qaybtani waxay u qaybsan tahay laba qaybood oo waawayn kuwaas oo kaqeybgalayaasha si qoto dheer u fahansiin doona horumarinta hanaanka ku saleysan aagga deegaanka

1. **10ka walxood ee hagaya habka ku saleysan aagga deegaanka:** Ma jiro qeexitaan caalami ah oo lagu heshiiyey oo ku saabsan hanaanka ku saleysan aagga deegaanka, mana jiro qaab hawleed la xiriira. Si kastaba ha noqotee, cilmi baaris lagu sameeyay dadaalada qorshooyinka ku saleysan aagagga deegaanka ee magaalooyinka ayaa keentay in la sameeyo tiro ka kooban 10 walxood oo hagaya ka shaqeysiinta hanaankan. Marka ay jirin hagitaano kale oo cad, ReDSS waxay qaadatay qodobadan waxtar leh ee u shaqeeya mabaadi'da hagitaan ahaan ee qiimaha leh si loogu adeegsado hawlgaladan. Casharka cinwaankiisu yahay "habab ku saleysan aagga" waa in loo qaybiyaa ka qaybgalayaasha xilligaas. Hawl ikhtiyaari ah oo loo adeegsanayo kaararka lagu ciyaaro ee 10-ka walxood ayaa loo soo jeedinayaa halkaas (hoos ayaa lagu sharaxay) tababarka oo si gaar ah diirada loogu saarayo habka ku saleysan aagga, iyadoo la eegayo tusaale ahaan xaalad ay socoto diyaarinta qorshaynta hanaanka ku saleysan aagga.
2. **Hal aag/deegaan iyo hal dadweyne:** Sideen u xulanaa oo u xuduudeynaa aag si u bilow ugu noqoto hirgelinta qorshe ku saleysan aag? Dadkee ayaa loo tixgalinayaa qorshahan? Kuwani waa su'aalaha aan isku dayi doono inaan ka jawaabno inta lagu jiro qeybta labaad ee kulanka. Tiro ka mid ah daraasadaha kiisaska Soomaalida ayaa naga caawin doona inaan soo bandhigno tusaalooyin la taaban karo oo ku saabsan sida loo kala sooco loona beegsado dadweynaha. Bog maran ayaa kuu diyaar ah si aad ugu darto tusaale kasta oo maxalli ah oo ku saabsan qorshooyinka ku saleysan aagga ee laga fuliyay degmada / gobolka halkaasoo tababarka laga soo sameeyey

Wakhtiga

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac iyo bar

- Qiyaastii 30 daqiiqo qaybta koowaad ee hanaanka ku-saleysan aagga oo uu ay ku jirto Hawsha ugu horreeysa
- 30 daqiiqo qaybta labaad oo ay kujirto Hawsha 2aad
- 30 daqiiqo oo ah qaybta ugu dambeysa oo ay ku jiraan daraasadaha kiiska.

Waxaad ku dari kartaa hawl ikhtiyaari ah 10ka walxood ee habka aaga kusalaysan kaas oo lagu sharaxay hoos iyo qoraalada bogaggan. Kaliya isticmaal haddii tababarkaagu diiradda u saarayo qaab aag ku saleysan. Kulanka wuxuu markaa socon doonaa 2 saacadood halkii uu ka ahaan lahaa hal saac iyo badh.

Hawlaha

I. Habka aaga deegaanka ku saleysan.

1. **Hawsha 1aad: Koox uruur ah ka dhig oo magacaab qaybaha ka kooban qeexidda aagga ku saleysan:**

Hawshan ujeedkeedu waa inay ka-qaybgalayaashu ogaadaan oo kala furaan afarta qaybood ee waaweyn ee qeexidda hanaanka aaga deegaanka ku slayesan.

- Daabac dukumiintiga “Kulanka 1aad. hawsha 2aad. Qeexitaanka hanaanka ku saleysan aaga. Kooxda iyo magaca. ” afar illaa shan nuqul oo ku xidhan tirada ka qaybgalayaasha iyo kooxaha, isku qas qayb kasta oo ku rid afar ilaa shan baqshadood. Gacantaada haku ji8ro Cinwaannada qayb kasta ayadoo casaan ah ku jira baqshado ama ku xir biin.
- Ka codso ka qaybgalayaasha inay koox koox isugu soo ururiyaan dhammaan walxaha oo dhan qaab macquul ah, si ay ugu dhajiyaan xaashida la rogo ee sabuurada oo ku taagan lugo isla markaana ha magacaabeen koox kasta.
- Is-xog wareysi la same hal koox ah oo weydii kuwa kale inay saxaan ama faallo ka bixiyaan. Sii koox kasta cinwaannada casaanka ah si loogaga dhigo cinwaano ahaan koox kasta.

II. Maxay tahay sababta loo qaadanayo habka ku saleysan aagga? Waa maxay faa'iidooyinka loogu talagalay?

2. **Hawsha 2aad:** fadhi wadareed ama wadahadal kooxeedka ee looga hadlayo faa iidooyinka laga filayo habka deegaanka ku saleysan ee seddex kooxood oo muhiim ah: Dadka ay dhibaatadu saameysey, maamulada deegaanka iyo ururada gargaarka.

- Akhriso Xigasho: "Waxqabadyada ku saleysan aagga ee ay hoggaaminayaan hay'adaha maxalliga ah ama bulshooyinka waxay yeelan karaan faa'iidooyin ballaaran, waana in la dhiirrigeliyaa" (IRC, 2015)
- Weydii ka qaybgalayaasha ku jira fadhi wadareedyada ama kooxdooda (koox kasta waxay ka shaqeysaa hal ka mid ah 3da kooxood eek u kor ku xusnay) waa maxay faa iidooyinka balaaran ee laga filayo habka ku saleysan aagga sida ay qabaan. Si kale haddii loo dhigo, maxaa loo qaatay qaab deegaan ku saleysan?
- Qor ama sawir, jawaabahooda ku qor jaantuska xaahida la rogo nka hor intaadan tusin boggaga soo socda oo ah guudmarka kulanka.

III. Sideen u qorsheynaa xalalka waara ee ku saleysan aagga?

Hawsha 3aad (Khiyaari) .1 Playing cards. Kaararka lagu ciyaaro. hawl ikhtiyaari ah oo ku saabsan 10ka walxood ee habka ku saleysan aagga ee loo sameynayo seminaaro diiradda saaraya habka aagga ku saleysan. Howlahaan oo oo la sameeyo ayaa kulanka ka dhigaya inuu yeesho 30 daqiiqo oo siyaado ah. U qaybi kaararka ciyaarta. Hal ciyaar koox walba weydiina kaqeybgalayaasha in cinwaanka walax kastaa ku aado sharaxaaddiisa gacantaada haku haro nooca ereyga ee kaarka si aad u hubiso natiijooyinkooda. Kooxda ugu horeysa ee la soo baxeysa isku aadka saxda ah ayaa guuleysaneysaa.

Diyaarinta

- ☐ Daabac kulanka 2aad. hawsha 1aad. Dukumiintiyada kaararka lagu ciyaaro oo ah afar ilaa shan nuqul iyadoo kuxiran tirada kaqeybgalayaasha iyo kooxaha; isku qas darsin walba oo darsin kasta ku rid afar ilaa shan baqshadood si koox kasta loogu qaybiyo.
- ☐ Daabaco Qoraalka cinwaankiisu yahay "Habka ku saleysan aagga" si loogu qaybiyo, marka laga hadlayo boga ku saaban 10ka walxood ee hanaanka ku saleysan aaga
- ☐ Hawsha 3aad (ikhtiyaari ah) Daabac, jar, oo geli baqshadaha kaararka ciyaarta ee loo isticmaalayo hawsha 1aad.
- ☐ Haddii ay suurta gal tahay, ku buuxi boga maran tusaale ku saabsan xadeynta ama beegsashada laga fuliyay heerka deegaanka dhamaadka soo bandhigga.

Maqaalo Qoraal oo faaido leh oo aad akhrisan karto

- ☐ Area-based approaches in urban settings, compendium of Case studies, May 2019 edition, Urban Settlement Working Group, Global Shelter Cluster.
- ☐ Area-based approaches: what does this mean in practice? Draft ReDSS brief
- ☐ Humanitarian response to urban crisis, a review of area-based approaches, Elizabeth Parker and Victoria Maynard, Working paper, July 2015
- ☐ Settlements Approach Guidance Note, where boundaries and action merge, Urban Settlements Working Group, Dec. 2020
- ☐ Ten principles for area-based approaches in urban post-disaster recovery, David Sanderson and Pamela Sitko, Humanitarian Practice Network, March 2018
- ☐ Situation Overview, Social Cohesion, Galkayo North, Puntland, Somalia, Reach, June 2018
- ☐ Understanding the needs of urban refugees and host communities residing in vulnerable neighborhoods of Kampala. A multisector analysis of the dynamics of supply and access to basic services in nine vulnerable urban settlements, Reach, Agora, July 2018
- ☐ Lessons learned from three EU RE-INTEG Consortia (EIDACS, JSC, SDSC), ReDSS, Oct 2019
- ☐ Multi stakeholder approach to address urban displacement in Somalia, Mohamed Taruri, Laura Bennison, Shezane Kirubi and Aude Galli, FMR 63, Feb. 2020